**Bayaanka Takoor La'aanta ee SNAP iyo FDPIR ee Foomka Codsiga Wadajirka ah**

Iyada oo la raacayo shuruucda xuquuqda madaniga ee federaalka iyo Waaxda Beeraha ee Mareekanka ( USDA ) xeerarka iyo nidaamyada xuquuqda madaniga ah, USDA, hay'adaheeda, xafiisyadeeda, iyo shaqaalaheeda, iyo hay'adaha ka qeyb galaya ama maamulaya barnaamijyada USDA ayaa laga mamnuucay takoor ku saleysan isirka, midab, asal qaran, jinsi ( oo ay kujirto aqoonsiga lamaanaha iyo jihada galmada ), caqiido diimeed, naafonimo, da ', aaminaad siyaasadeed, ama aargudasho ama aargoosi howlaha hore ee xuquuqda madaniga barnaamij kasta ama waxqabad kasta oo ay fuliso ama ay maalgaliso USDA. Barnaamijyada hela kaalmada maaliyadeed ee Federaalka Waaxda Caafimaadka iyo Adeegyada Aadanaha ee Mareykanka (HHS), sida Kaalmada Ku Meel Gaarka ah ee Qoysaska Baahan (TANF), iyo barnaamijyada HHS ay si toos ah uga how galo ayaa sidoo kale ka mamnuuc ah takoorka hoos yimaada sharciyada federaalka ee xuquuqda madaniga ah iyo qaanuunyada HHS.

Dadka naafada ah ee u baahan hab kale oo isgaarsiineed oo loogu talagalay macluumaadka barnaamijka (tusaale, farta indhoolaha, far waaweyn, cajalad maqal ah, Luqadda Calaamadaha Mareykanka), waa inay la xiriiraan wakaalada (gobolka ama deegaanka) halkaasoo ay ka codsadeen dheefaha. Shakhsiyaadka dhagoolaha ah, maqalka adag ama kuwa hadalka naafada ah waxay kala xiriiri karaan USDA Adeegga Gudbinta Federaalka (800) 877-8339. Intaa waxaa sii dheer, macluumaadka barnaamijka waxaa lagu heli karaa luqado aan Ingiriisi ahayn.

**CABASHADA XUQUUQDA MADANIGA AH EE KU LUG LEH BARNAAMIJYADA USDA**

USDA waxay bixisaa kaalmo maaliyadeed oo federaal ah barnaamijyo badan oo cunto yarida ah iyo yareynta gaajada sida Barnaamijka Caawinta Nafaqada ee Dheeraadka ah ( SNAP ), Barnaamijka Qaybinta Cuntada ee Kaydka Hindida ( FDPIR ) iyo kuwa kale. Si aad u xarayso cabashada barnaamijka takoorka, buuxi Foomka Cabashada Takoorka, (AD-3027) laga helimkaro onlaynka:
https://www.fns.usda.gov/sites/default/files/resource-files/ad3027-somali.pdf
iyo xafiis kasta oo USDA ama warqad u qor USDA oo ku bixi warqadda dhammaan macluumaadka lagu codsaday foomka. Si aad u codsato nuqulka foomka cabashada, wac
(866) 632-9992. Ku soo gudbi foomkaaga ama warqaddaada USDA oo dhammaystiran:

1. **boosto**: Adeegga Cuntada iyo Nafaqada, USDA
   1320 Braddock Place, Qolka 334, Alexandria, VA 22314; ama
2. **fakis:** (833) 256-1665 ama (202) 690-7442; ama
3. **taleefan:** (833) 620-1071; ama
4. **emayl**: FNSCIVILRIGHTSCOMPLAINTS@usda.gov.

Macluumaad kasta oo kale oo ku saabsan arrimaha SNAP, shaqsiyaadku waa inay la xiriiraan USDA SNAP Nambarka Khadka Tooska ah (800) 221-5689, kaas oo sidoo kale ku qoran Isbaanish, ama wac Macluumaadka Gobolka/Nambarada Khadka Taleefanka (guji xiriiriyaha si aad u hesho liiska lambarrada khadka taleefanka) gobolka); laga helayo onlaynka: https://www.fns.usda.gov/snap/state-directory.

**CABASHADA XUQUUQDA MADANIGA AH EE KU LUG LEH BARNAAMIJYADA HHS**

HHS waxay ku bixisaa Kaalmada Maaliyadeed ee Federaalka barnaamijyo badan kuwaa soo lagu xoojinayo caafimaadka iyo samaqabka, oo ay ku jiraan TANF, Head Start, Barnaamijka Caawinta Tamarta Guryaha Yar ee Dakhliga ( LIHEAP ), iyo kuwa kale. Haddii aad aamminsan tahay in laguugu takooray jinsiyadaada, midabkaaga, asalkaaga qaran, naafonimada, da'da, jinsiga ( oo ay ku jirto xaamilonimada, jihaynta jinsiga, iyo aqoonsiga jinsiga ), ama diinta barnaamijyada ama howlaha HHS sida tooska ah uga hool gasho ama HHS ay siiso kaalmada maaliyadeed ee federaalka, waxaad cabasho u gudbin kartaa Xafiiska Xuquuqda Madaniga ( OCR ) shaqsiyadaada ama qof kale.

Si aad u gudbiso cabashada takoorista naftaada ama qof kale oo ku saabsan barnaamij laga helayo kaalmada maaliyadeed ee federaalka iyada oo loo marayo HHS, ku buuxi foomka khadka tooska ah ee internetka iyada oo loo marayo Portal-ka Cabashada OCR: https://ocrportal.hhs.gov/ocr/. Waxaad sidoo kale kala xiriiri kartaa OCR boostada: Hawlgallada Maareynta Kiiska Bartamaha, Waaxda Caafimaadka iyo Adeegyada Aadanaha ee mareekanka, 200 Independence Avenue, S.W., Qolka 509F HHH Bldg., Washington, D.C. 20201; Fakis: (202) 619-3818; ama Emayl: OCRmail@hhs.gov. Si loo dardar geliyo qaab dhaqsaha ah, waxaanu kugu dhiirigelinaynaa inaad isticmaasho khadka tooska ah ee OCR si aad u xarayso cabashooyinka halkii aad ka xareyn lahayd boostada. Dadka u baahan in lagaa caawiyo xereynta cabashada xuquuqda madaniga waxay ku soo diri karaan OCR: OCRMail@hhs.gov ama wac OCR lacag la'aan 1-800-368-1019, TDD 1-800-537-7697. Dadka dhegaha la', maqalkoodu ku adag yahay, ama ay qabaan dhibaato hadal, fadlan garaac 7-1-1 si ay u helaan adeegyada gudbinta isgaarsiinta. Waxaan sidoo kale bixinaa qaabab kale ( sida Braille iyo daabacaad ballaaran ), aaladaha kaabayaasha ah iyo adeegyada kaalmada luqadda oo bilaash ah oo loogu talagalay xereynta cabashada.

Hayadani waa bixiye fursad loo siman yahay.